



Shirkii Qoyska Qawmiyada Laatiinaha Oo La Qaban Doono bisha Abriil 7deeda

Waa sanadkii todobaad ee Qoyska Laatiinaha ardaydooda ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ay ku kulmi doonaan Shirweynaha Qoyska Laatiinaha Dugsiyada Dadweynaha Portland. Munaasabadani oo halku- dhigeedu yahay “Bulshada ku mideysan dhinaca waxbarashada,” kulankaasi wuxuu socon doonaa 8:30 subaxnimo ilaa 3:30 galabnimo. Maalinta Sabtida ee bisha Abriil tahay 7da goobtuna waa Dugsiga Sarre ee Madison. Bandhiga agabka waxbarashada wuxuu socon doonaa isna laga bilaabo 10:30 subaxnimo ilaa 2:00 duhurnimo.

Waxa la rajeynayaa qoysas lagu qiyaasay 300 qoys, oo ka kala socda Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Iskuulada Degmada Bari ayaa la filayaa inay ka soo qeybgalaan. Sida ay sheegeen [Latino Network](#), hay’ada shirweynaha qabaneyna , ujeeddada munaasabadni waa sidii ay “ardayda iyo waalidiinta u siin lahayd fursad ay ku kulmaan maalin dhan iyada oo kor loogu qaadayo iyo dadka ka hadlaya munaasabada ay ku dhiirigalinayaan sidii ay waalidiintu ay maalgalin weyn ugu sameyn lahaayeen dhinaca waxbarashada

Shabakada Laatiino waxa ay iskaashi la lahayd Dugsiyada Dadweynaha Portland dhowr sanno, iyada oo ujeedaddiisuna tahay “isbedel togan oo dhinaca nololaha qoysaska Laatiino iyo bulshadeeda.”

Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ku hadla luqada Isbaanisha ee jecel inay wakiil ka noqdaan waaxyaha munaasabada in ay halkan ku soo gudbiyaan [foomka diiwaangalinta](#) maalinta Jimcaha, Maarso 23keeda.